HORMUUDKA AQOONTA

Sbbtbn bbmlb!vhv!rbbmjtbo!ff!bbebn bib;!Sbbtbn bbmx bybb mb!zjsbbiebb!x byb!tvhbo!ff!iboueb!lb!tpp!ibeib!n bslb mb!jtlb!cjyjzp!x byzbbmbib!dje!lbmf!lvhv!mffebibz/!Sbbtbn bbmlv!x bb!rjjn bib!tvhbo!ff!ibouejeb/!Sbtbbn bbmbeb!x bybb!mpp!lbmb!rbzcjzbb!tbeefy!oppd!pp!lbmb!bi;!Sbbtbn bbmlb!Djmn jhb!)brppoub*-!Sbbtbn bbmlb!lifzsbbelb!ebcjjdjhb!)Obuvsbmsftpvsdft*-!jzp!Sbbtbn bbmlb!n ppelb!jzp!n bhvvsubeb!)sfbmdbqj.ubm*/!Sbbtbn bbmlb!djmn jhv!x bb!x bycbsbtibeb!jzp!iffslb!brppoub!rpglv!lb!kpphp!bn b!vn n beev!lb!kpphup/!Sbbtbn bbmlb!lifzsbbelb!ebcjjdjhv!x bb!ojn dbeb!Bmbi!lv!cffsbz!eivmlb/!Sbbtbn bbmlb!n ppelb!jzp!n bhvvsubev!x bb!iboujeb!ebelv!ubcdbep!tjeb!eijtn bzbbtib-!cbbcvvsub-mbdbhub!dbeebbolb!bi-typpmbib!oppm-!jxn /!Sbbtbn bbmlb!lifzsbbelb!ebcjjdjhb!jzp!sbbtbn bbmlb!n ppelb!jzp!n bhvvsubev!jtlv!kjip!vn b!lpsbbo-!n jecb!kjip!bzvv!bbebb!ibeejj!sbbtbn bbmlb!djmn jhv!lb!n brbo!zbibz!pp!n jeip!eibmtn b!mfi/!Mbcbeb!ipsf!x bybz!jtlv!kjip!v!lpsj!lbsbbo!ibeejj!sbbtbn bbmlb!djmn jhv!lv!eify!kjsp!lbbt!pp!n jeip!eibmtgjjdbo!lb!lffoj!lbsb/!Tjebbt!ebsuffe!sbbtbn bbmlb!vhv!rbbmjtbo!ff!bbebn viv!zffmbo!lbsp!x bb!brppoub!bn b!djmn jhb/!Ebelb!sbbtbn bbmlb!brppoub!mfi!x bybz!lb!eijejebbo!n btlbyeb-!mbbljjo!ebelb!mbcbeb!sbbtbn bbmff!lbmf!jtlv!ubybmvkjzb!pp!bbo!ebobzo!brppoub!x bybz!lb!eijejebbo!ebcbeb/!Rpg!lbtupx!lbmb!eppsp!jobbe!n btlby!lb!eijejef!oprpup!jzp!jobbe!ebcp!lb!eijejef!oprpup/!!

HORMUUDKA AQOONTA

Nvhhb!2bbe!Dbebelb!
3bbe!
Nbkbmbe!cjmf!bi!pp!lb!

ILAYS EDUCATIONAL ACADEMY

Wpmvn f!2!Jttvf 3!
Pdupcfs!3118!

Dallada Waxbarashada ee Ilays Educational Academy waxay dadaal ugu jirtaa sidii mandaqada Sool, Sanaag iyo Cayn looga heli lahaa manhaj waxbarasho oo is haysta laga bilaabo dugsi hoose ilaa jaamacad si bulshada loogu soo saaro qof tayo waxbarasho leh. Ma tijaabisey xarumaha waxbarashada ee Dallada Waxbrashada Ilays. Fadlan ubadkaaga kula daadaal inay helaan manhaj taxane ah.

SUNTA LAGU DUUGO SOMALIA

Heshiisyo iyo dhacdooyin hore ay galeen madax ku sheegyada Soomaaliya intii u dhexaysey 1990 – 2005. Majalad kasoo baxda dalka Talyaaniga oo lagu magcaabo, **Famiglia Cristiana**, ayaa daabacday qoraalo xidhiidh ah oo si caddaan ah u faahfaahinaya eedayno la xidhiidhay sunta lagu duugay Soomaaliya. Majaladu waxay magacawday labada shirkadood oo kala ah **Achair Partners** (Swiss), **Progresso** (Italian). Baadhitaanka Majalada waxaa ka dambeeyey in xisbiga la yidhaahdo **European Green Party** Baarlamaanka Yurub u soo gudbiyeen nuqullo ka mid ah heshiis ay kala saxiixdeen labadaas shirkadood iyo nin matalayey **"madaxweynihii markaas"** Cali Mahdi Maxamed. Heshiiskaas oo dhigayey in Soomaaliya lagu duugo sun [toxic waste] miisaankeedu dhan yahay 10 million tonnes, taas oo lagu bedeshey hanti gaadhaysa $80 million oo US Dollar. Ilaa xilligaas iyo wixii ka dambeeyey wuxuu Cali Mahdi diidanaa inuu arrintaas ka hadlo. Baarlamaanka Talyaanigu wuxuu sameeyey baadhitaan dambe oo ay ku caddeeyeen in heshiiskaasi dhacay. Heshiiskaasi wuxuu dhacay December 1991, waxaana Cali Mahdi Maxamed "maamulkisii" u saxiixay "Wasiirkisii Caafimaadka" **Nuur Cilmi Cismaan**. Qorshuhu wuxuu ahaa in sanadkiiba Soomaaliya lagu duugo sun miisankeedu dhan yahay 500,000 tons.

Magaalada Xaafuun

Qoraal ay faafisay shabakada Hafza (Febraayo 18, 2005) waxay shaaca ka qaaday waraaqihii lagu kala saxeexday heshiis sheegaya in la kiraystay magaalada Xaafuun muddo dhan 99 sanadood ah. Heshiiskaas oo Xaafuun ka dhigaysa mid si toos ah uga madax banaanan sharciyada iyo qawaaniinta Soomaaliya iyo kan Puntland. Xaafuun waxaa lagu dhiqidoona sharci iyo qaanuun u gooni ah oo ay u dejiso Hafza [Horn of Africa Free Zone Authority], taas oo looga gol leeyahay in laga dhigo meel u madax bannaan ganacsiga ay tooska u maamusho HAFZA. Heshiiskaas oo u dhaqangeliwaayey Hafza ka dib markii shacabka Soomaaliyeed ka hor yimaadeen arrinkaas.

Ku soodhowow HOTEL ATAASH
Lascanod oo aad ka helayso jiif raaxo leh, cunto fudud, fadhi wanaagsan, cabitaan kulayl iyo qabow leh. Waxaa halkaas kugu sugaya shaqaale u tababaran hawshooda.

Inside this issue:

Tusmada Cadadka

Dallada Waxbarashada ee Ilays Taxana Taariikhda Jaamacada Nugaal 1
Sunta lagu Duugo Soomaaliya Magaalada Xaafuun Silsilada Taxanaha Sheekooyinka Carruurta 1
Caafimaadka Ilka Carruurta Ya-Yar 2
Maamulka iyo Maaraynta ka baro Hormuudka Aqoonta Sidee Hooyo Fiican Loo Noqdaa? Waxbarashada, Macalimiinta iyo Waalidiinta Arrimaha Anshaxa Ganacsiga 2
Ku soodhowow Adeega Waxbarashada ee Dallada Ilays Academy Arrimaha Bulshada SSC Noocyada Ciidaha 3
Bogga Cilmiga Sayniska iyo Horumarka Adduunaka Murtida Sooyaalka ah Doqonimo Daawo ma leedahay? 4
Islaamku Wax Door ah ma ku Leeyahay Horumarka Cilmiga Sayniska 4

TAXANAHA TAARIIKHDA JAAMACADA

Heerka 2aad ee jaamacadu soo martay waa xilligii curinta iyo abaabulka. Xilligaas waxaa bilaabmay dhaqdhaqaaqyo badan oo u ordaya in jaamacad la hirgeliyo, laakiin aanay ka dhexayn wax isku xidhnaansho ah. Dhaqdhaqaaqyadaas mid kasta wax baan ka orandoonaa haddii Allah idmo. Dhaqdhaqaaqii ugu horeeyeyna waxaa ka mid ah:

The first idea about the need of higher education in Sool, Sanaag and Cayn came from in Scandinavia in 1996. The second group who discussed this issue were in Holland in 1998. The third group who favoured this issue were in Canada and Lasanod in 2000 and fourth group who discussed this issue were in USA in 2002. There are also some survivals and written documents about the conception phase including.

Scandinavia Document
Holland Document
Lasanod ana Canada Document
USA Document
UK Document

Scandinavia Document

DARWIISH SCHOOL OF APPLIED SCIENCES

Dugsiga Darwiish waa dugsi loo asaasay inuu waxbarashada ka haqabtiro dadka Soomaaliyeed ee u haraadan waxbarashada casriga ah ee dunida, yoolka koowaad ee dugsigu hiigsanayaa wuxuu yahay in la soo saaro dad tayo waxbarasho oo sare leh. Ka bacdi markii muddo dheer la dhawrayey in wuxuun dawlad ah la helo oo soo noolaysa nidaamkii waxbarashada, waxaa caddaatay in ay dheer tahay xilliga dawladi wax soo celin karto, sidaas darteed waxaa lagama maarmaan noqotay in dadweynaha Soomaaliyeed wax bedel ah loo helo; si haddaba loo badbaadiyo faca soo socda, isla markaana loo dabaqabto facii ku soo beegmay xilligii dawlad la'aanta, waxaa koox dhalinyaro ah maskaxdooda ka soo maaxatey in magaalada Laascaanood laga furo dugsiga la magac baxay «Darwiish School of Applied Sciences». Dugsiga Darwiish wuxuu dadweynaha ka haqabtirayaa waxbarshada heerka dugsiga sare ah iyo waxbarasho heer jaamacadeed ah labadaba.

Dugsiga Darwiish in la sameeyo, wuxuu ku yimi iyadoo dhalinyaro badani aragtay dhibaatada dalkeena ku soo socota ee jirid jarka ah. Waayo sida aynu ognahay dadkii dalka wax u bartay way ka baxeen, booskii qof wax yaqaaney ka baxayna waxaa fadhiistay nin reer baadiye ah. Gaalo oo dhammina waxay ku heshiiyeen in muddo seben ah dalka sidaas lagu hayo. Ka bacdii markii dhibaatadaasi noo muuqatay, waxaa lama huraan noqotay in wax fal ah arrintaas laga geysto. Weliba waxaa jirtey in laba dal oo aan iska warhayn in mid waliba arrinta dugsiga ku hawlanaa. Dhalinyarada gobolka Sool ee ku nool dalka Denmark, waxay ku hawlanaayeen in Laascaanood laga sameeyo dugsi ka kooban: Labo machad oo dugsi sare ah, iyo afar machad oo heer jaamacadeed ah. Macaahida ay danaynayeena waxay ahaayeen kuwa soo socda:

Machadka Tababarka Macalimiinta (institute of education), Machadka Caafimaadka (institute of nurse training), Machadka Horumarinta Xoolaha iyo Beeraha, oo u sii qaybsama Waaxda Xoolaha iyo Waaxda Beeraha, Machadka Horumarinta Maamulka iyo Ganacsiga, oo u sii qaybsama Waaxda Kombuyuutarada, iyo Waaxda Maamulka Ganacsiga, Machadka Dugsida Sare, oo saddex sanno ah

Machadka Farsamada Gacanta, oo ka kooban Qaybta Dhismaha, Qaybta Dabka, iyo Qaybta Nijaarada.

Sidoo kale waxaa jirtey in dhalinyarada gobolka Sool ee ku nool dalka Norway, ay iyaguna ku hawlanaayeen dugsi kan reer Denmark la mid ah, laakiin xoogaa qaabka dhismihiisa ka duwan yahay. Dugsiga reer Norway ku hawlanaayeen wuxuu u dhisnaa sida soo socota:

Machadka Dugsiga Sare (institute of secondary school), oo labo sanno ah, Machadka Maamulka iyo Maaraynta (institute of management and administration), oo hal sanno ah, Machadlka Cilmiga Kombuyuutarka (institute of information technology) oo labo sanno ah, Machadka Xisaabaadka iyo Maaraynta Ganacsiga (institute of accounting and business administration) oo saddex sanno ah, Machadka Waxbarashada (institute of education) oo labo sanno ah, Machadka Afafka (institute of language) oo labo sanno ah, Machadka Tababarka Kalkaalisooyinka (institute of nurse training) oo labo sanno ah.

Iyadoo dal kasta arrimihiisa gooni u watey, oo aan la iska warhayn, ayaa waxa dhacday in warkii is gaarey sannadkan horaantiisii. Ka bacdi waxaa bilaabmay xiriir iyo wado hadal. Ugu dambayn waxaa bishii Juunyo, 1999ka shir dugsiga lagaga hadlayo lagu qabtay magaalada Oslo. Shirkii waxaa ka soo baxay arrimaha soo socda:

Dugsiga waxaa la isku afgartay inuu noqdo qaab shirkadeed oo dadka qurbuhu maalgashadaan. Markii hore reer Norway iyo reer Denmark way ku kala duwanaayeen aragtida lahaanshaha dugsiga. Reer Denmark waxay qabeen in dugsigu noqdo dugsi caam ah (public school) oo dadweynuhu caawimo ku wado. Reer Norway waxay qabeen in dugsigu noqdo dugsi gaar (private school), oo isagu soo saara kharashka lagu socodsiinayo.

Fikrada dugsiga waa in la gaarsiiyaa qof kasta oo danaynaya, sida lagu gaarsiinayaana waxay tahay in Internetka la geliyo, isla markaana loo socdo. Hawsha Internet gelinta waxaa qaaday reer Denmark. Hawsha socodkana waxaa loo qaybsaday sida soo socota: Reer Denmark waxay qaadeen xilka Finland, Denmark, Sweden, Nederland, iyo dalal kale oo Yurub ah. Reer Norway waxay qaadeen xilka UK, USA, Canada, iyo Norway.

Shirka waxaa lagu asaasay guddi guud oo lacag ururin ah, isla markaana waxaa la isku afgartay in qolo waliba dalalka ay u xilsaaran tahay ka dhisto guddi lacag ururin ah. Guddiga guud ee lacag ururintu waa kuwa soo socda: 1) Guddoomiye: Siciid Faarax Dheere Muxammad «Denmark», 2) Guddoomiye ku xigeen: Cabdisalaam Muxammad Xuseen «Norway», 3) Lacaghaye: Suleymaan Muxammad Axmed «Norway», 4) Xoghaye: Cabdicasiis Axmed Muxammad «Denmark».

Magaca Dugsiga waxaa la isku afgartay inuu noqdo «Darwiish School of Applied Sciences».

Dadka danaynaya hirgelinta dugsiga waxaa loo qabtay muddo lix bilood ah oo ka bilaabanta bisha Luulyo ilaa bisha Diisambar ee 1999ka. Ugu yaraana waa in qofku ku soo darsadaa hal saami oo u dhigma shan boqol oo dollar ($500). Sidoo kale qofkii sadaqo la baxaya waa laga qaadayaa.

Waxaa la isku afgartay in Shirkadda Amal ee xawaalada laga furo xisaab dadku lacagaha ku soo shubaan, hawshaasna waxaa loo xilsaaray lacaghayuhu inuu soo sameeyo.

Qaab dhismeedkii dugsiga waa la isku shaandeeyey. Ka bacdi markii muddo la gorfaynayney, waxaa noo soo baxay dugsi aanu u qaabaynay sida soo socota:

La soco cadadka dambe iyo sidii Jaamacada Nugaal ku timi. Sidaas iyo socdaal wacan.

Bogga Silsilada Sheekooyinka Carruurta

Boqor iyo Jugley Jire

Beri baa waxaa jirey nin boqor ah oo xukumi jirey dhul fog oo badda ka talowsan. Boqorku waxa dunida jooga wuxuu ugu jeclaa buugaagta. Subax subxaha ka mid ah buu u baxay fasax si uu dhowr maalmood ugu minjo baxsado dhulka baadiyaha ah ee ka durugsan magaalada. Maalin fasaxiisii ka mid ah baa qoraxdu ku kulaatay, ka bacdina wuu istaagay oo fadhiistay meel fadhi ah oo geed hoostii ku taal si uu u nasto. Buug buu jeebkiisa kala soo baxay si uu u akhristo, laakiin wuu daalanaa oo wuxuu u dhacay hurdo.

Markuu duhurkii hurdadii ka kacay, wuxuu qaatay weysadiisii oo tukadey, ka bacdina wuxuu bilaabay inuu gurigiisii ku dheelmado. Markuu socday hal mayl iyo xoogaa wuxuu xusuustay inuu buugiisii kaga yimi geedkuu seexday. Boqorku ma rabin inuu dib u noqda, isla markaana ma rabin inuu buugiisa waayo. Muxuu sameeyaa? Boqorku wuxuu naftiisa ku yiri waxaa laga yaabaa inaan helo cid i caawisa. Markuu hareerihiisa dhugteyba wuxuu arkay wiil shimbiro jugley ah la jooga kur yar oo u dhow gunteeda.

Boqorkii wuxuu u dhaqaaqay xagii wiilka, ka bacdina wuxuu ku yiri wiilow ma taqaan fadhiga ku yaal geedka halkaas ku yaal ee jidka dhiniciisa ah, wiilkii wuxuu ugu jawaabey haa waan aqaan. Boqorku wuxuu u sheegay inuu buug ku soo ilaawey. Haddaad buugaas ii soo qaado waxaan ku siinayaa lacagtaas quruushta ah ee dahabka ka samaysan. Wiilkii yaraa waxaa birbirqay indhihii markuu arkay lacagtii, waayo wuxuu qaadan waayey warka boqorku u sheegayo. Wiilkii wuxuu boqorkii u sheegay waa arrin fiican, laakiin shimbiraha kama tegi karo. Haddaan ka tago way cararayaan oo waa iga lumayaan. Boqorkii wuxuu ugu jawaabey anaa shimbiraha sii ilaalinaya oo waxba ma xumaanayaan haddii Allah idmo.

Wiilkii wuxuu boqorkii ku yiri qaado shaabuuga, waxaan kuu doonayaa buugii. Waxaana kugula dardaarmayaa inaad ilaaliso coomirka ugu weyn shimbiraha, isagaa hogaamiya oo shimbiruhu waxay aadayaan meesha coomirku aado. Boqorkii wuxuu qaatay shaabuugii, wiilkiina wuxuu bilaabay inuu buugii doono. Markuu caabar socday wiilkii wuxuu u dhawaaqay boqorkii oo ku yiri haddaad rabto inaad shimbiraha isu celiso shaabuuga u rux.

Boqorkii wuxuu ku fadhiistay dhagax, ka bacdina wuu isla qoslay isagoo ku qoslaya inuu maanta jugley jire noqday. Muddo ka bacdi waxay shimbirihii ogaadeen in jirehoodii ka maqan yahay, deeto waxay bilaabeen inay ciyaan oo xudhuumaan, ka bacdina waxay bilaabeen inay dooxada fog u yaacaan. Boqorkii wuu ka daba orday, laakiin xoog uma ordi karayn oo way ka carareen. Wuxuu u ruxay shaabuugii, laakiin way dhegaysan waayeen. Arrintii waxay sii xumaatay markii shimbirihii ku degeen beer dad kale leeyahay oo ay ka cuneen khudradii iyo fawaakihdii.

Saacad ka bacdi waxaa soo noqday wiilkii oo buugii sida, laakiin wuu naxay oo cadhooday markuu arkay shimbirihii oo tegey. Wiilkii wuxuu yiri waan kuu soo helay buugii, laakiin waxaad iga lumisay shimbirahaygii. Awalba waan garanayey inay sidaasi dhacayso. Boqorow waxaad iga caawisaa sidaan shimbiraha beerta uga soo saari lahaa. Boqorkii isagaan kelmadna odhan buu wiilkii u dhiibay shaabuugii. Wiilkii wuxuu boqorkii ku yiri istaag xaydaanka beerta agtiisa oo kor u dhawaaq aniguna waxaan ruxayaa oo garaacayaa shaabuuga si shimbiruhu beerta uga soo baxaan. Boqorkii wuu sameeyey arrintii wiilku faray. Ka bacdi markay hawshii xoogaa wadeen waxay ku guulaysteen inay shimbirihii beertii ka soo saaraan.

Boqorkii wuxuu wiilkii ku yiri waxaan kaa filayaa inaad isaamaxdo, waayo jugley jire fiican ma noqon. Hoo lacagtaan kuugu balanqaaday, mid waxaad u qaadataa buugii aad ii soo heshay, midna waxaad u qaadataa dhibaatadaan kuu geystay. Anigu boqor baan ahay oo shaqada noocan oo kale ah la iima tababarin. Wiilkii yaraa wuu qayliyey isagoo leh kuma garanayn inaad boqorkayagii tahay. Aad baan uga xumahay boqorow haddaan kaaga cadhaysiiyey. Boqorow waan ku maqlay iyadoo dadkoo dhan ku leeyihiin waa boqor fiican. Sheekada waxaynu kaa faa'iidaysanaynaa:

1. Hogaamiyaha dadku waa inuu waxbarashada iyo buugaagta la saaxiib yahay.
2. Hogaamiyaha dadku waa inuu ahaado midaan dadkiisa laga ilaalin, degan, oo xataa carruurtu la xaajaysan karto.
3. Hogaamiyuhu waa inuu deeqsi yahay dadka wax siiya oo aan waxba cunin ilaa uu hubiyo in dadka kale wax cuneen.
4. Hogaamiyuhu waa inuu yahay qof cadaalad badan.
5. Hogaamiyuhu waa inuu yahay mid dadka u shaqeeya oo aan kursiga iskaga fadhiisan.

Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa saddex baa boqornimo kaa qaada:

1. **Gar weecsan**
2. **Gudoon jilicsan, iyo**
3. **Gacan gudhan**

Boqorka sheekadu ka hadlayso waa cadaali, gudoon adag oo dadka wax siiya. Sifooyinka xun -xun oo dhan waa ka nabadgalay. La soco cadadka dambe bisha November iyo sheeko cusub.

OGAYSIIS: Dallada Waxbarashada Ilays Educational Academy waxay dadweynaha ogaysiinaysaa in Schooladii dib loo furay cidii ka dib dhacda November 1, 2007 boos uma hayno. Waxbarashadu waxay si rasmi u bilaabmayaa October 27.

MUHIMADA CAAFIMAADKA ILKA CARRUURTA YAR-YAR

Ilkuhu waa xubin muhiim oo mudan in caafimaadkooda la daryeelo. Weliba daryeelkooda waa in laga bilaabo inta ilmuhu yar yahay, waayo caafimaadqabkay yaraanta kala tagaan wuxuu anfacaa markay da'doodu weynaato. Ilkuhu waxay jidhkeena u hayaan shaqo muhiim ah, waa xubinta ugu muhiimsan ee dheefshiidka cuntada, waxay burburiyaan cuntada si ay jidiinka u dhaafto, isla markaana waxay caawiyaan dheecaanada cuntada burburiya si ay u fududaato in dheefshiidku degdego.

Ilkaha dadku waa laba kooxood. Kooxda 1aad waxay ilmaha u soo baxaan markuu 3 bilood ilaa 6 bilood jiro oo waxaa la yiraahdaa **ilka dhalaanka** ama **ilkaha axaleed**. Nooca labaad waa ilkaha rasmiga ah ee bedela ka bacdi marka kuwa dhalaanku dhacaan. Caafimaadqabka kooxda hore wuxuu cimrigooda raajiyaa ilkaha dambe ee rasmiga ah.

Dadku waxay leeyihiin saddex nooc oo ilko ah. Nooca koowaad waxaa la yiraahdaa "**Dhoolo**" (incisors), waxaana lagu isticmaalaa wax goynta iyo qaniinyada. Nooca 2aad waxaa la yiraahdaa "**Miciyo**" (canine), waxaana lagu isticmaalaa wax daloolinta iyo jeexista shayada kala duwan. Nooca 3aadna waxaa la yiraahdaa "**Gawso**" (molars) waxaana lagu isticmaalaa calaalinta iyo burburinta cuntada.

Sidaas darteed waxyaalaha carruurta ilkahooda waxyeela waxaa ugu badan macaanka iyo qabowga, waana labada shay ee carruurtu ugu jecel yihiin. Haddii la yiraahdo ilmaha macaanka iyo qabowga ha laga ilaaliyo suurtagal maaha, laakiin waxaa waalidiinta, macalimiinta iyo dadka kale ee carruurta ka masuul ah laga rabaa inay ilmaha faraan oo baraan inuu cadayga joogto ka dhigto, ugu yaraan waa in ilmuhu maalintii cadaydaa ilaa afar jeer oo kala duwan, labada ugu daran ee madhaafaanka ah waa xilliga ilmuhu seexanayo, iyo markuu soo tooso. Cadaygu wuxuu ilkaha ka dabargooyaa **huurada** (plaque) oo dhibaato weyn u geysan karta **ciridka**, isla markaana wuxuu ilkaha ka ilaaliyaa qudhunka (decay) dhexdooda ku samaysma, iyo magarka oo isna nooc huurada ka mid ah. Magarka badankiisa waxaa keena caday la'aanta oo waa huuro meesha rasiin ku noqotay, laakiin waxaa jira qaar la sameeyo oo la yiraahdo dabar, si gabadhu u noqoto mid wiilasha soo jiidata ama wiilku gabdhaha u soo jiito. Arrintaas waa xaaraam oo waa nooc dhilaysiga ka mid ah. Dad badan oo dibadaha tegey baa magar lahaa, waxay la kulmeen dhib badan oo lagu caayayo inay huuradii iska nadiifin waayeen.

Dugsiyada mandaqada Sool ugu horumarsan waxaa ka mid ah: Hanaqaad Primary Scool, Ilays Primary School iyo Daruuraha Primary School. iwm.

Maamulka iyo Maaraynta ka Baro HA

Haddii Allah idmo casharkani wuxuu noqondoonaa mid taxane ah laga bilaabo cadadkan si dadweynaha iyo maamulayaashu u bartaan maamulka iyo maaraynta. Hordhac ahaan waxaa rabnaa inaan kala saaro macnayaasha erayo badan oo daruuri u ah waxbarashadaada. Waxaan isku deyeynaa inaan kala fahano kelmadaha: maamule (manager), maamul (management), Jiritaan (organisation or entity), ganacsi (business), maarayn (means), yool (vision or goal), ujeedo (objective), aragti (theory), saylad (market), dhaqaale (economic), faa'iido (profit), dakhli (income or revenue), kharash (expense or expenditure), qiimo (value), lafo (cost), iyo sicir (price). Iyadoo ay badan yihiin kelmadaha lagu isticmaalo maamulka, maaraynta, ganacsiga, dhaqaalaha iyo xisaabaadka waxaynu casharkan ku soo koobaynaa inaynu fahano kelmadaha kore.

Maamule (manager): Dhinacyada kala duwan ee nolosha waxaa kelmada maamule loo isticmaalaa siyaalo kala duwan. Haddii dhibaato kaa haysato qolka aad seexato ee hotelka waxaad oranaysaa meeyey maamulihii? Haddii dhibaato kaa haysato shirkada telefoonada waxaad oranaysaa meeyey maamulihii? Haddii dhibaato kaa haysato dugsiga ilmahaagu dhigto waxaad oranaysaa meeyey maamulihii. Si aan haddaba u fahano kelmada maamule ma jiraan wax ka dhexeeya maamuleyaasha kala duwan? Dhamaan maamulayaasha kor xusan waxay ururinayaan **xogta** cabashada, waxay **baadhayaan** sababta dhibtani u dhacday, waxay **qorshaynayaan** sidii ay dhibta u sixi lahaayeen, waxay ka **warbixinayaan** dhibaatada jirta, isla markaana waxay qaadanayaan **go'aan** lagu saxayo dhibaatada. Sidaas darteed waxaa jira nidaam ka dhexeeya maamulayaasha oo dhan. Halkaas waxaa ka soo baxay in maamule kasta shaqadiisu tahay: **Macluumaad** ama **xog** ururiye (information), **Baadhe** (monitoring or investigating), **qorsheeye** (planning), **warbixiye** (reporting) iyo **go'aan qaate** (making decision).

Maamule waxaa lagu qeexi karaa qofka dejiya yoolka jiritaanka (**setting managerial objectives of organisation**), isla markaana raadiya maaraynka (***searching for alternative means***) lagu gaadhayo yoolka, isagoo xog ururinaya, baadhitaan samaynaya, la soconaya, qorshaynaya, warbixin qoraya ka bacdina go'aan qaadanaya oo fulinaya falka ku haboon.

Maamul (magament): waa sidii loo horumarin lahaa hawlgudashada iyo maaro u raadinta yoolka jiritaanka si loo xaqiijiyo in maamuluhu gaadhay ujeedooyinkiisii iyo in jiritaanku xaqiijiyo yoolkiisii.

Jiritaan (organisation or entity): waa dad iyo mashiino loo qaabeeyey si gaar ah iyo hanaan waxsoosaar si ay u dhamaystiraan ujeedo la hiigsanayo. Jiritaanadu waxay u jiraan inay dhamaystiraan shaqo ama hawl aan keli keli loo qaban karin.

Ganacsi (business): waa rogroga iyo macaamilaadka wax kala gadashada iyo wax kala iibsashada kaladuwan ee ay sameeyaan jiritaanada ganacsigu, kuwaas oo soo saara alaabo (products) iyo adeeg (service) si ay u xoogsadaan faa'iido.

Maarayn (means): waa jidka, maarada ama wasiilada jiritaanku ku gaadho ujeedadiisa iyo yoolkiisa. Marka jiritaanku ujeedo leeyahay wuxuu ku gaadhi karaa siyaalo kala duwan oo kala sahlan, jid kasta oo ujeedada lagu gaadho waxaa la yiraahdaa maaro.

Yool (vision or goal): waa bartilmaameedka jiritaanku hiigsanayo inuu gaadho. Yoolku waa sababta jiritaanku u jiro oo ah meesha ujeedadiisu ku dhamaato. Tusaale ahaan: haddii jiritaanka yoolkiisu yahay inuu soo saaro dadka dunida ugu waxbarasho fiican. Waa in la helaa dad waxbarasho fiican oo jiritaanku soo saaray.

Ujeedo (objective): waa qorshe sanadeedka, qorshe bileedka, iyo qorshaha maalin kasta ee shaqada la gudanayo. Ujeedadu xaga derajada way ka hoosaysaa yoolka jiritaanka. Tusaale ahaan haddii jiritaanka ganacsiga yoolkiisu yahay inaan soo saaro timirta ugu macaan Africa. Ujeedooyinka jiritaanku waxay noqonayaan imisa geed baynu sanadka beeraa, sidee baynu dhirta nafaqadeeda kor ugu qaadnaa, imisa shaqaale ah baynu ubaahanahay, kharash intee le'eg baa sannad kasta gelaya. Ujeedooyinka jiritaanka ganacsigu waa in:

a. la caddayn karaa oo mucayin yihiin (specific)
b. la cabiri karaa oo la qiyaasi karaa (measurable)
c. la gaadhi karaa oo aanay fogayn (attainable)
d. la xaqiijin karaa runnimadeeda (realistic)
e. la xadidi karaa waqtigooda (time limit)

Haddii ujeedooyinku buuxiyaan shantaas shuruudood waa sax oo waa lagu dhaqmayaa. Ujeedadu waa mihiim ku hogaamisa. Qofku haddii aanu ujeedo lahayn la jiifiyaaba banaan oo waa mabda'laawe aan waxba xeerinayn. Dhibaatooyinka maanta ummadda haysta waxaa sababa mabda'laawenimada iwm.

Aragti (theory): waa weedho tilmaamaya mabaadi guud oo walaxdu ama shaygu ku salaysan yahay. Mabaadidaas oo tilmaamaya xidhiidhka ka dhexeeya xubnaha walaxdaasi ka kooban tahay, iyo cilmiga laga soo dheeganayo. Kelmadaha intooda kale kala soco cadadka bisha dambe ee Hormuudka Aqoonta iyo bogga **baro maamulka**. Sidaas iyo socdaal wacan.

Sidee baa Hooyo Fiican loo noqdaa?

Beri baa waxaa is guursaday wiil iyo gabadh dhalinyaro ah. Gabadhii way uuraysatay, laakiin waxay aad uga welwelsaneyd haddii ilmo u dhasho sidii ay u noqon lahayd hooyo fiican oo ilmaheeda tarbiyadaysa. Isla markaana waxay dareensanayd in hooyo fiican la noqdaa inay tahay dariiqaan sahlanayn. Gabadhii waxay la hadashay ninkeedii, iyadoo u sheegaysa xaalada ku soo wajahan. Labadooduba waxay garawsadeen in arrintu ku adkaanayso haddii aanay hadda ka diyaargaroobin, waayo midna hore carruur uma barbaarin. Sidaas darteed waxay go'aan ku gaadheen inay raadiyaan sidii ay u baran lahaayeen. Gabadhii waxay ka fasaxqaadatay shaqadeedii. Isla markaana waxay bilowday inay hooyooyin badan ka waraysato sidee carruurtiina u barbaarisaan. Mudo dhowr bilood ah waxay ururinaysay waraysi ay la yeelatay hooyooyin badan oo isugu jira kuwo dhalinyar iyo kuwo da'weyn. Haweenkay waraysanaysey waxay u kala qaybisay: 1) **hooyo dhalinyaro ah oo casri ah** 2) **hooyo dhalinyaro ah oo dhaqameed** 3) **hooyo weyn oo casri ah iyo** 4) **hooyo weyn oo dhaqameed**. Hooyooyinkaasi waxay isugu jireen kuwo carruur yaryar haysta, kuwo carruur waaweyn haysta, kuwo hal carruura haysta, iyo nooc kasta wax ka haysta. Kuligoodna waxay si dareen furan uga hadlayeen siday carruurta u barbaariyaan. Gabadhii uurka lahayd waxay aragtay inay jiraan dariiqooyin kala duwan oo carruurta loo barbaariyo. Laakiin wax badan oo ay aragtay kama aanay helin mana jeclaysan. Waxay aragtay hooyooyin badan oo aad u dadaalaya laakiin laga naxayo daalka iyo barbaarin xumada ilmahooda haysata. Gabadhii waxay ku qanciweydey natiijadii uga soo baxday daraasaadkeedii, isla markaana waxay garatay inay jirto dariiqo lagu noqdo waalid wanaagsan oo ilmo fiican lagu soo saaro taasoo ka duwan waxyaalahay soo aragtay. Mar kasta waxay ku dhadhabi jirtey guriga waalidka fiican joogaa waa inuu ahaadaa miday ka jirto: jacayl, nabad iyo farxad dhammaan carruurta iyo waalidkaba.Gabadhii waxay mar kale bilowday daraasaad cusub oo ay ku raadinayso sidee baa lagu noqdaa barbaariye wanaagsan. Laakiin markan dambe wax badan bay fahantey oo waxay diyaarsatay su'aalo badan oo qofka warka kasoo qufaya. Su'aalaha ay weydiinaysey waxaa ka mid ahaa: La soco cadadka dambe.

Waxbarashada, Macalimiinta iyo Waalidiinta

Arrimaha waxbarashada ee cadadkan waxaan kaga hadlaynaa saddex arrimood oo kala ah: Maxaynu carruurta wax u barnaa? Doorka macalimka iyo doorka waalidku ku leeyahay waxbarashada ilmaha. Arrinta ah maxaynu carruurta wax u barnaa waa si aynu ugu diyaarino inay berito ummaddooda, bulshadooda iyo naftooda u noqdaan xubin waxsoosaar oo muhiim ah taas oo dalkooda wax ku soo kordhisa. Halkaas waxaynu ka fahmaynaa in horumarkeena, mustaqbalkeena iyo islaaxa ummadeenu ku jiro waxbarashada iyo sida aynu u diyaarino ubadkeena maanta. Sidaas darteed waa muhiim in xil la iska saaro waxbarashada ubadka soo koraya. Xikmad baa sheegaysa inay jiro hal kelmed oo run ah oo haddii la fahmo xal u ah dhibaatooyinka degmadeena haysta, dhibaatooyinka ummadeena haysta, iyo dhibaatooyinka dunida oo idil. Runtaasi waxay ku ursursan tahay hal kelmad oo keliya. Kelmadaasi waa "**Waxbarasho**".

Waxbarashada rasmiga ah ee waalidiinta laga rabo inay ubadkooda kula dadaalaan waa 3 jir ilaa 16 jir. Haddii intaas la gaadhsiiyo isagaa qofku iswadaya wixii intaas ka dambeeya. Mudadaasina waa inta ilmuhu ku jiro waxbarashada asaasiga iyo dugsiga sare. Sidaas darteed horumarka ilmaha iyo ummaddu wuxuu ku jiraa waxbarashada. Ummadduhuna waxay u kala horumarsan yihiin siday u kala waxbarasho fiican yihiin.

Macalimiintu waxay door muhiim ah ku leeyihiin waxbarida ilmaha iyo horumarka bulshada. Nebigeenu isagoo tilmaamaya doorka macalimka wuxuu yiri: "macalimku wuxuu ku dhowaaday inuu rasuul la soo diray noqdo." Halkaas waxaynu ka fahmaynaa inta masuuliyada macalimka laga rabo le'eg tahay taas oo Allah hortiis iyo aadamaba lala xisaabtamayo. Sidaas darteed macalimow ma og tahay masuuliyadaada? Maanta inta badan masuuliyadaasi waa dayacan tahay. Macalimiinta badankoodu waxay miidaanka waxbarashada ugu jiraan inay xoogaa nolol ah ka helaan, laakiin himigooda, himiladooda iyo hiwaayadoodu midna ma aha inay macalinimo xirfad ka dhigtaan, taasina waxay sababtay in tayada waxbarashadu hoos u dhacdo, waayo wuxuu fasalkii noqday doon uu hogaaminayo nin aan naakhuude ahayn. Macalimiinta waxaa laga rabaa inay Allah ka cabsadaan oo tayada ilmaha ay wax u dhigayaan kor u qaadaan, maalka macalimow aad qaadanayso waxaad ku kasbatay inaad ilmahaas waxbarto, haddii marka la waayo ilmo tayo waxbarasho leh maalka aad qaadatay waa xaaraam. Jidhka xaaraamta ku korana waad la socotaa waxa ciqaab u yaal Allah agtiisa. Kaba daran haddaad maalkaad qaadatay reer ku dhaqato oo ilmo ku korsato. Hal xiiso haddaad macalimow soo habsaanto waa xaaraam maalka aad qaadanayso. Sidaas darteed macalimiintu waa inay ilaaliyaan anshaxa wanaagsan ee ummadda iyo dalkooda, waayo macalimiintu waa tusaale lagu daydo, waa dhimbiil baxaysa oo la eeganayo. Tayo xumada macalimiinta ee Lascanod waxaa u daliil ah lama hayo arday waxbaratay oo waxbarashada jecel, ardayda magaalada joogta waa wada ul oo ul la qaato ma leh.

Waalidiintu waa xubinta ugu mihiimsan tarbiyada iyo waxbarashada ilmaha. Waalidka doorkiisana waxaa ka mid ah inay la socdaa oo ogyihiin in ilmahoodu maalin kasta dugsiga soo xaadiro. Waalidiintu waa inay ka shaqeeyaan in ilmuhu soo quraacdo, dugsiga yimaado waqtiga la gelayo, sidoo kale waa inay ka shaqeeyaan in ilmuhu dugsigs yimaado isagoo waxbarasho u diyaar ah. Xiliga ilmuhu dugsiga ka imaanayo waa inay la socdaan si aanu meelo xunxun ama carruur kale oo dhaqan xun u raacin. Waalidiintu waa inay ilmaha ku dhiirigeliyaan inuu u hogaansamo sharciyada iyo amarka maamulka dugsiga. Waalidiintu waa inay dugsiga war siiyaan hadday arkaan inaan ilmahoodu hogaansamayn si ay isaga kaashadaan dhibaatada. Haddii ilmahaaga dugsiga lagu dhibo waa in waalidku dugsigsa wargelyaa. Waalidka haddii dugsigu ugu yeedho kulan waa inuu yimaadaa. La soco cadadka dambe bogga Waxbarashada, Macalimoonta iyo Waalidiinta.

ARRIMAHA ANSHAXA GANACSIGA

«**A science which hesitates to forget its founder (Allah) is lost**». Culimada cilmiga ganacsigu waxay yidhaahdaan anshaxu waa mabda'a ugu muhiimsan ganacsiga (ethics: the most fundamental principle of business). Erayga «ethics» inaga afkeena wuxuu la macno yahay «anshax». Anshaxa toosan iyo dhaqanka wanaagsan waa calaamadaha muhiimka ah ee lagu yaqaan horumarka bulshada toosan. Markaa in mudnaan gaar ah la siiyo toosinta anshaxa qofka iyo bulshada waa shay aad u muhiin ah, waayo wuxuu anshaxu koobaa nolol maalmeedka gaarka ah iyo kan guudba. Marka anshaxa bulshada xumaadana waxaa lagu yaqaan dhac, tuugo, laaluush, ku xadgudub xoolo dadweyne, iyo xadtooyo. Sidaas darteed wuxuu ganacsigu ka mid yahay arrimaha anshaxa bulshada lumiya oo ubaahan in la toosiyo si looga hortago dhibaatooyinka ka imaanaya. Ugu horayn waxaan si xeel dheer uga hadlaynaa anshaxa ummadda inaan saxno, ka bacdina waxaan si gaar ah ugu gudbaynaa anshaxa ganacsiga.

Anshaxu waa asluubta ama xeerarka wanaagsan ee qofka ama bulshadu ku kala garato waxa wanaagsan iyo waxa xun, ama waxa saxa ah iyo waxa khaladka ah. Sidoo kale waxaynu anshaxa ku qeexi karnaa xeerarka asluubta toosan ee xukuma qofka iyo camalkiisa. Anshaxa qofka waxaa xukuma damiirka qofka, tusaale ahaan waxaad arkaysaa qof ku odhanaya waxaa inaan sameeyo damiirkayga ayaa ii diidey. Laakiin haddii qofka ama bulshada damiirkiisa ama damiirkeedu dakhramo waxaa dhacda in qofkaas ama bulshadaas damiirkoodu aqbalo shayga xun oo ay wanaag u arkaan; isla markaana ay xumaan u arkaan shayga wanaagsan.

Rasuulka Allah (scw) wuxuu inoo sheegay in ay jidhka qofka ku jirto waslad yar oo cad ah, haddii wasladaasi hagaagto qofka iyo jidhkiisa inta kale way hagaagayaan; haddii wasladaasi xumaatana qofka iyo jidhkiisa inta kale way xumaanayaan. Nebigu wuxuu intaas ku daray in wasladaasi tahay qalbiga qofka weliba isagoo farta ku fiiqaya laabtiisa.

Xadiiska Nebiga waxaynu ka fahmaynaa in haddii qofka qalbigiisu xumaado in qofkaasi noqonayo mid xumaanta aqbala, wanaagana ka dheeraada. Haddii qofka qalbigiisu caafimaadqabo waxay keenaysaa in qofkaasi noqdo mid wixii wanaagsan aqbala, wixii xuna ka dheeraada. Sidaas awgeed ansha qofka ama bulshada waxaa wanaagiisa lagu ilaalin karaa iyadoo qalbiga qofka daawo loo helo. Weydiinta meesha taal waxay tahay: Sidee baa caafimaad loogu heli karaa qalbiga qofka?. Weydiinta jawaabteedu waa fududahay oo waxaynu odhan karnaa haddii qofka ama bulshada laga helo arrimaha soo socda qalbiga wanaagiisa daawo ayaa loo helayaa. Arrimahaas oo ah kuwa soo socda waxay keenaan in qofka ama bulshada anshaxeedu tooso.

Qofka ama bulshadu waa inay ku toosnaadaan asalka diinta Islaamka. Taasi waxay keenaysaa in qofka noloshiisa ama bulshada nolosheeda loo helo qiyam (criterion) ma guuraan ah si loo yareeyo welwelka iyo walbahaarka nolosha adduunyada. Sidaas darteed in asalka diinta Islaamka la raaco waxay keenaysaa in qofka ama bulshada loo helo xeerar negi oo nolosha dhidibada u aasa.

Qofku waa innuu la noolaadaa Qur'aanka. Qur'aanka oo ah manhajka Allah dunida ugu talagalay ilaa Qiyaamaha wuxuu qofka dhimirkiisa ka safeeyaa denbiyada iyo gefefka ka dhaca. Sidaas darteed waxaa Qur'aanka lagu qeexi karaa daawada 1aad ee qalbiga qofka.

Qofku sidoo kale waa inuu raacaa sunnada Nebiga (scw). Nebigeenu wuxuu xiddiddada u aasay wax kasta oo ummadda Islaamku raaci lahayd sida: qiyamka ummadda, qiimaha ummadda (Islamic value), caadooyinka ummadda, anshaxa ummadda, habka dhaqandhaqaale ee ummadda Islaamka, iwm. Sidaas daerteed waa marjaca ugu ballaadhan ee qofka muslimka ahi ka heli karo daawo kasta oo noloshiisu u baahan tahay.

Sidoo kale qofka dhimirkiisu wuu isbedelaa haddii uu ka durko saddexda qodob ee aynu soo sheegnay. Markaa waxaa loo baahan yahay in qofku qalbigiisa ku cusboonaysiiyo Qur'aank iyo kutubta caqiidada ee baraysa Allah jiritaankiisa iyo weynidiisa.

Marka afartaas arrimood iyo kuwo kale la helo waxaa ka abuurma in la helo qof anshax suuban oo jidka Allah ku taagan, isla markaana adkaysi iyo dulqaad u leh inuu xaliyo dhibaatooyinka la soo dersa. Ummadda ka kooban shakhsiyaadka noocaas ah waxay noqonaysaa ummad qorshaysan (planned nation) oo u dhugmo yeelata horumarka bulshadeeda iyo daryeelka manhajkeeda.

Haddii Allah idmo waxaan wax yar ka odhanayaa waxyaalaha keena in qofka damiirkiisu dhinto, iyo farqiga u dhexeeya damiirka qofka iyo dhimirka qofka. Sidoo kale waxaynu wax ka odhanaynaa waxyaalaha qofka ku dhaca marka damiirkiisu dhinto. Damiirku waa xeerarka xishoodka ee qofka ku dhaqaajiya inuu fal sameeyo ama ka joogo. Anigoo ku horaynaya waxyaalaha keena in qofka damiirkiisu dhinto waxaan soo qaadanayaa dhowrka qodob ee soo socda.

La soco cadadka bisha dambe iyo Hormuudka Aqoonta, bogga Anshaxa Ganacsiga.

KU SOODHOWOW ADEEGA DALLADA WAXBARASHADA EE ILAYS EDUCATIONAL

Ujeedooyinka Waxbarashada Ilmaha ee Sanadaha Hore - Early Years Learning:
Ilmuhu waa inuu horumar ka sameeyaa xaga qofnimada; xaga arrimaha bulshada; xaga arrimaha degaanka; xaga ku hadalka luqada, qorista, akhrinta, higaadinta weedhaha adag; xaga xisaabta, fikirkeeda, adeegsigeeda iyo inuu ku fahmo nolosha dunida; xaga cilmaga guud iyo fahanka dunida; xaga cilmiga sayniska iyo sancada casriga ah; xaga maskaxda, hal abuurka fikirka iyo wax ka ogaanshaha dunida ku xeeran. Ilmuhu waa inuu horumar ka sameeyaa xaga isla jaanqaadka xubnihiisa kala duwan, waa insha, gacanta, muraqa, maqalka, iwm mar wada jaanqaadi karaan. Kelmada qofnimada waxaa looga jeedaa inuu ilmuhu is fahmo wuxuu yahay iyo doorka uu nolosha ku leeyahay.
Dallada Waxbarashada ee Ilays Educational Academy waxay iskuulada, macalimiinta iyo waalidiinta mandaqada Sool, Sanaag iyo Cayn u soo jeedinaysaa inaynu samaysano nidaam waxbarasho oo inaka dhexeeya. Hal maamul oo sare leh, gole waxbarasho leh, manhaj isku mid ah, fikir isku mid ah, lebis isku mid ah, fasax isku mid ah, tayo isku mid ah, tabar macalimiin oo isku mid ah iyo adeeg waxbarasho isku mid ah. Taas micnaheedu maaha in cidna meesheedii laga qaadayo, laakiin waxaan u jeednaa in wixii jirey dib u habayn lagu sameeyo oo tayo sare loo yeelo si meeshaadu kuugu barwaaqowdo.
Anagu haddaanu nahay madaxda sare ee Dallada Ilays Educational Academy waxaanu soo dhowaynaynaa dhamaan maamulayaasha iskuulada, macaamadaha, maamulayaasha waxbarashada, macalimiinta, waalidiinta iyo dhamaan dadka ku hawlan miidaanka waxbarshada inaynu talo midaysan yeelano. Hadddii la helo nidaam waxbarasho oo midaysan anagu Ilays ahaan waxaan samayn karnaa wax badan oo waxbarashada fududaynaya.
Qaabka hoos ku qoran waa tusaale sheegaya sida sanadaha waxbarashada ee carruurta loo qaabeeyo.

SOCDAALKA WAXBARASHADA EE KA BILAABMA PRIMARY SCHOOL ilaa SECONDARY SCHOOL		
Da'da	**Heerka Dugsiga**	**Nooca Dugsiga**
3 ilaa 5 Jir	Foundation Year	**Nursery School**
5 ilaa 7 Jir	KS1 Infant School	**Primary School**
7 ilaa 11 Jir	KS1 Junior School	
11 ilaa 14 Jir	KS3 Juvenile School	**Secondary**
14 ilaa 16 Jir	KS4 GCSE School	
16+ Jir	KS5 A Level	**College or**

Sidoo kale jaantuska soo socda wuxuu sheegayaa qaabka loo nidaamiyo inta maalmood ee ilmaha sanadkii laga rabo inuu kursiga iskuulka fadhiyo iyo inta uu fasax yahay. Dunida aad baa loo qiimeeyaa inta ilmuhu kursiga iskuulka fadhiyo sanadkii.

SANAD DUGSIYEEDKA WAXBARASHADA EE ILAYS SECONDARY IYO PRIMARY SCHOOLS	
XILLIGA DAYRTA	**95 MAALMOD**
Xilliga 1aad wuxuu bilaabmaa	**1st September sanad kasta**
Fasaxa Xilliga 1aad	**27th October ilaa 3rd November**
Dhammaadka Xilliga 1aad	**27th December**
XILLIGA GUGA	**90 MAALMOOD**
Xilliga 2aad wuxuu bilaabmaa	**4th January sanad kasta**
Fasaxa Xilliga 2aad	**27th February ilaa 6th March**
Dhammaadka Xilliga 2aad	**27th April**
XILLIGA XAGAAGA	**81 MAALMOOD**
Xilliga 3aad wuxuu bilaabmaa	**4th May sanad kasta**
Fasaxa Xilliga 3aad	**13th June ilaa 19th June**
Dhammaadka Xilliga 3aad	**31st July**
FASAXYADA KALE EE GUUD IYO KUWA ISLAAMKA	
Ramadaan	**20th ilaa 30th Ramadaan**
Ciidda Fitriga	**3 Maalmood bacda Ramadaan**
Ciidda Udxada	**3 Maalmood oo Carafa ka bilaabma**

Sawiro ka mid ah manhajka cusub ee Ilays Educational Academy

Xarunta Computers ka ee Ilays Educational Academy

Dallada Waxbarashada ee Ilays Educational Academy Head Office

Arrimaha Bulshada Sool, Sanaag iyo Cayn

DUGSI MA LEH QABYAALADI WAXAY DUMISAMOOYAANE? Daraawiishtii ka bacdi Sool, Sanaag iyo Cayn waxay soo mareen saddex xukuumadood oo kala ah: Xukuumadii gumeysiga Ingiriiska, xukuumadii Soomaaliya iyo xukuumada Puntland. Waxaa ugu waxtar roonayd xukuumadii Ingiriiska oo waxyaalo la taaban karo u qabatay magaalada Lascanod iyo Ceerigaabo. Dhamaan xafiisyada maamulka ee hadda waxaa dhisay xukuumadii Ingiriiska, labo iskuul, dhakhtarka iyo guryaha shaqaalaha dawlada. Xukuumadii Soomaaliya waxay keliya oo Lascanod u dhistay Bangiga Lascanod iyo guryaha bangiga. Xukuumada Puntland lama hayo waxay qabatay ilaa iyo hadda. Xukuumadahaas oo dhan waxay mandaqada ula dhaqmayeen sidii wax la iska ilaaliyo oo xoog lagu cabudhiyo, taas oo sababtay in horumarka mandaqadu hoos u dhaco. Waxyaalaha kale ee dhamaan xukumadahaasi sameeyeen waxaa ka mid ah in dadka mandaqada qabiil qabiil iyo reer reer la isugu diro. Xukuumadii ugu horaysey ee Ingiriiska waxaa maamulka mandaqada u dhiibtay Carab Dheere oo ahaa nin aad kibir badan. Ingiriiskuna wuxuu amar ku siiyey inuu wuxuu doono samayn karo. Ismaaciil Mire markuu kibirkiisa ka yaabay wuxuu yiri: **Mid kuwaas ka daran baan arkaa oo aan kadab u laabnayne**, **inta uu kashbacay oo kashbacay oo Kaman wan weyn yeeshay**, **buu duul karaamiyo colba leh kiish ka buuxsadaye**, **ka shib dhaha islaamow naftaas kii lahaa gadaye**. Sidoo kale Dhacarbe oo dhashay mandaqada oo ka cabanayey waxtar xumada xukuumadihii Soomaaliya wuxuu yiri: **dawladooy tabaalow, toban toban laguu aas**, **taarkaagu soconwaa**, **bal maxay na taraysaa oo tii hore ku dhaantaa**. Maanta waxaa inuka hardamaya Soomaaliland iyo Puntland, xukuumad kastaana waxay wadataa danteeda gaar ahaaneed, maxaa inaga inoo dan ah oo aynu wadanaa, talo la'aan arrintu waa halkii xukuumadihii hore oo kale. Halkaas waad ogtihiin waxaa ina dhigay wax isu quudhiwaaga dhexdeena, isu tanaasulid la'aanta dhexdeena, wax isu garasho la'aanta dhexdeeda iyo xasadka dhexdeena. Xukuumad hore oo wax inoo qabatay ma jirto sidaas darteed yaan la isku maandhaafin sandareerooyinka shakhsiyaadku qaataan. Ha la tashado oo arrin guud iyo arrin ummaddeed ha laga shaqeeyo, cadaalada ha lagu dadaalo oo ha laysu tudho.
Ha la iska dhaafo qabyaalada iyo reer reernimada. Qabyaaladu dugsi ma leh waxay dumisa mooyaan. Ha la iska dhaafo beenaha xunxun ee reeraha loo kala sheegayo ee aan sal iyo baarka lahayn. Xukuumadaha lala kala socdo haddii aynaan danteena ugu midoobin waa inaku dulsoconayaan. Sidoo kale Adam Carab oo ka cabanayey waxtar xumada xukuumadihii soo maray mandaqada Sool, Sanaag iyo Cayn wuxuu yiri:
Ingiriis dalkiisii mudhxi oo cune magoolkiiye
Isagoo masaafura haddaan subax ka miidaanshey
Oo lagu mintiday waw dhammayn minawarkaa fuule
Maskab kama dhaxline wiilal baa helay macaankiiye
Kun nin baa martabadii u hadhay ama muluugtiiye
Inta kale mus ood laga rogtey bay meerayaan dibade
Sidii baan marqaafyo u sitaa ama maraykaane
Sidii baan Midgaha uga kartaa maas faruur go'ane
Sidii baan maqaar ugu gam'aa meel la ii dhigaye
Sidii baan makaar lagu gubtiyo milic u joogaaye
Sidii baan madaal dheri karshiyo rodol u miistaaye
Sidii baan macaash uga gataa harag miciinkiise
Sidii baan martida caano qudha ugu macsuumaaye
Sidii baan masruuf uga dhigtaa midhaha Toomoode
Sidii baan muwaashiga hayaan ugu maqiiqaaye
Sidii baan majiiraha dhabada ugu masaafoone
Sidii baan manjaha ugu socdaa moodhar li'idiiye
Sidii baan tacliim ugu madhnahay milicdi diineede
Sidii baan madow ugu jiraa maato iyo ruuxe
Sidii baan macruufkow sugaa macallimkiisiiye
Sidii baan magtii uga baxshaa muumin kii dilaye
Sidii baa miskiin tulud lahaa looga mariyaaye
Sidii baan haddii tuug i miro midigta loo goyne
Sidii baan xafiis meel fog jira ugu muctaadaaye
Sidii baa sharcigu meyd u yahay aan murwo lahayne
Muqdishaba horteed waa dhaqnayn marag Ilaahaye
Bal muxuu micneeyoo na taray ministarkaan doortay.
Mooskadaan raggow duulayee maylka tirinaaya
Goormaa waxay muujiyeen lagu manaafiicsan?
Ma mardaaddi baa socodka aan miiq la qabanaynin
Sow riigna noogama mudaan madashada Buuhoodle.
Maadaama aan u jeedno inaanay jirin xukuumad wax inoo qabatay mid soo socotana rajada laga qabaa ay aad u yar tahay. Ma waxaynu reer reer ula kala safanaa dad shakhsiyaad ah oo iyagu xukuumadaha si gaar ah dheef ugu qaba, hadday arrintu sidaas tahay wax jiraba ma nihin. Dadka xukuumadaha inooku jira waa inaynu ku qiimaynaa waxay dalka iyo dadka u qabteen. Laakiin maaha inaynu sida xoolaha raacno oo iska hogaansano, inagoo taageerayna qof isagu keligii manfac ka hela xukuumada uu u shaqeeyo. Nimanka iyo naagaha xukuumadaha inooku jira waxaad weydiisaan ma xukuumadahaa meesha idiin dhiibtey baad wakiil iyo ambassadors u tihiin oo idiin soo dirsaday inaad mandaqada Sool, Sanaag iyo Cayn uga wakiil tihiin? Mise waxaad metelaysaan dadka reer Sool, Sanaag iyo Cayn oo kursiga ugu fadhidaan? Dadweynuhu waxay ubaahan yihiin in arrintaas jawaabteeda la helo. Madaxda reer Sool, Sanaag iyo Cayn waxay inta taariikhda la ogyahay iyo ilaa hadda u muuqdaan inay yihiin ambassadors xukuumado soo dirsadeen. Haddii aanay sidaas ahayn aaway waxqabadkoodii, waxaaba bulshada dhib ku haya kala taageerkooda qabyaalada iyo reer habelnimada ku salaysan.
Haddii aynu nahay bulshada reer Sool, Sanaag iyo Cayn waxaynu ubaahanahay inaynu xukuumadaha la xisaabtano, waxaynu ubaahanahay inaynu siyaasiyiinteena la xisaabtano, waxaynu ubaahanahay inay garaadadeena la xisaabtano; waayo iyagaa bulshada madaxeedii ku fadhiya, waxaynu ubaahanahay inaynu si wadajir ah u fekerno, waxaynu ubaahanahay inaynu danteena guud ka horumarino danteena gaar, waxaynu ubaahanahay inaynu raadino cida caqabada ku ah horumarkeena, waxaynu ubaahanahay inaynu garano ninka ina kala dilaya, waxaynu ubaahanahay inaynu nabadeena ka shaqayno, waxaynu ubaahanahay inaynu mandaqadeena danteeda garano.

A leader who does not hesitate before he sends his nation into battle is not fit to be a leader.

Laamigii Lascanod oo dadweynuhu xidheen markii ay Soomaaliland qabsatay October 15, 2007. Dadweynow haddii aynu xidhno ilihii dhaqaaluhu ka soo baxayey oo dadkii qixino, isla markaana dagaal ina gelisaan ma is qabataa? Dagaal haddaad gelayso laba waxyaalood iska ilaali qaxa iyo in ilaha dhaqaaluhu iska kaa taagaan. Waxa dhacay uma eka wax caqli lagu maamulay ee dib ha loo eego.

Wataa colaad cidhibteedu war nabada iyo talo wadaaga ha laga shaqeeyo oo yaan la degdegin

Halkani mar bay laamiga Lascanod ahayd

NOOCYADA CIIDAHA

Ugu horayn Ramadaan kariim iyo ciid wanaagsan maadaama bishii October ay Ramadaana ahayd, isla markaana ciid ahayd. Intaas ka bacdi waxaa noo sugnaatay inaan wax ka niraahno noocyada ciidaha, si khaladaad badan oo dadku sameeyaan u saxno.
Dadyowga dunida ku nool waxay leeyihiin maalmo ay daneeyaan oo muhimad gaar ah u leh. Maalmahaas oo ay dabaaldegaan, cuntooyin dhaqan samaystaan, dhar dhaqan xidhtaan, isla markaana cayaaro iyo wixii la mid ay sameeyaan. Dhamaan ciidaha iyo fasaxyadu waxay ka soo jeedaan oo salka ku hayaan diin, wadanimo, ama cawaanimo.
Haddii aan tusaale soo qaadano ciida Nayruuska ama dabshidka oo ay u dabaaldegaan Iiraaniyiintu, iyo Soomaalida qaarkeed waxay salka ku haysaa diinta majuusiga ee kuwa dabka caabuda. Iiraaniyiintu waxay shidaan dab isla markaana waxay dhigaan miis weyn oo la soo saaray todoba cunto oo kala duwan oo dhammaantood ka bilaabma xarafka "S". Todobada cunto waxay u taagan yihiin: nolol, caafimaad, tiro badan, hodon, jacayl, sabir iyo isdaahirin. Sidoo kale waxay miiska soo ag dhigaan shayo kale oo u taagan "sanad wanaagsan", shayadaas waxaa ka mi ah: muraayad, shamac, ukun, iyo hilibka kaluunka dahabiga goldfish.
Ciida ay Americanku u dabaaldegaan ee October 31 oo la yiraahdo Halloween waxay ka soo jeedaa dalka Ireland iyo England boqolaal sano ka hor. Waxayna ku salaysan tahay inay beeraleyda labadaas dal aaminsanaayeen in marka xilliga midho gurashadu damaato ay soo degto waxay ugu yeedhi jireen "bad spirit" oo macnaheedu yahay nasiibkii xumaa. Si haddaba bad spirit ka loo caydhiyo waxay shidi jireen dab ama oog, isla markaana waxay lebisan jireen dhar foolxun, madaxana waxay gashan jireen geedka bocorka oo hoosta laga xoldhay si ay ugaga cadhaysiiyaan nasiibkaas xun ee soo degaya. Iminka markay dabaaldegayaan waxay carruurta u geliyaan dhar foolxun, madaxana waxay u geliyaan geedka bocorka, markaas bay ku wareegaan xaafadaha si macmacaan loo siiyo. Markaad sheekada dhuuxdo ama iyagaba la sheekaysato waxaa kuu cadaanaysa waxa la xusayaa inuu yahay nooc jinka ka mid ah.
Ciidaha wadanimadu waa badan yihiin dal kastana wuxuu leeyahay dad ay xusaan oo dalkooda arrimo muhiih ah ka soo qabtay. Sida inagaba uu Sayid Muxammad qalbigeena ugu weyn yahay.
Dalka Japan waxay sideeda April u dabaaldegaan dhalashadii Gautama Siddhartha oo ah alifihii diinta ay haystaan ee Budhismka.
Yuhuudu waxay u dabaaldegaan ciido diineed oo ay ka mid yihiin Rosh Hashanah, Passover, iyo Hanukkah.
Kiristanku waxay dhalashada Ciise Masiix u dabaaldegaan shan iyo labaatanka December. Waxay kaloo sheegaan in Nebi Ciise la salbiyey, ka bacdina uu salbintii ka soo noolaaday (resurrection day). Sidaas darted waxay usbuuca u danbeeya March iyo Usbuuca u horeeya April u dabaaldegaan soo noolaanshihii Nebi Ciise. Ciidaasna waxaa afkooda lagu yiraahdaa Easter Holiday.
Ciida ay reer galbeedku u dabaaldegaan February 14 sanad kasta ee magaceeda la yiraahdo "Valentine's Day" waxaa loo bixiyey maalinta Jacaylka Adduunka. Waxayna u sugnaatay dadka is jecel, saaxiibada, iyo qaraabada kala luntay. Arrintaas waxba kama jiraan ciidani waa ciid diineed ee bal warka naga gur. Ciidani waa ciid lagu xuso nin ka mid ah Awliyooyinka Diinta Masiixiga oo magaciisa la yiraahdo: Saint Valentine. Sidaas darteed hadiyadaha la isu diro, waraaqaha la isu qoro iwm dhamaantood waxaa lagu xusaa Saint Valentine ee sidaas ula soco. Sanadkii hore ee ina soo dhaafay dad badan baa Lascanod ciidaas ka xusay. Ogaada arritaasi waa gaalmi, waxaad keliya oo cudurdaar leedihiin haddii jahli jirey.
Qolada diinaha oo dhan ka soo horjeeda waxay u dabaaldegaan sannadka cusub, waxayna isku salaamaan "HAPPY NEW YEAR". Markii qolo kasta maalin yeelatay bay iyaguna sanadka cusub ciid ka dhigteen.
Mulimiintu waxay u dabaaldegaan Ciida Fitriga, Ciida Udxada iyo maalinta jimcaha. Ciid kale oo la inoo jideeyey ma jirto. Wixii kale ee lala yimaado waxba kama jiraan. Dadka xusa Nayruuska ama dabshidka ha ogaadeen inay arritani ku salaysan tahay diinta majuusiyiinta iyo qolyaha dabka caabuda. Maqaalka noocyada ciidaha waxaan u soo qaadanay in dadku dawgooda gartaan si

Ilays Educational Academy waxay soo jeedinaysaa hal eray oo run ah oo haddii la fahmo xal u ah dhibaatooyinka degmadeena haysta, dhibaatooyinka ummadeena haysta, iyo dhibaatooyinka dunida oo idil. Runtaasi waxay ku urursan tahay hal kelmad oo keliya. Kelmadaasi waa "**Waxbarasho**".

Majalada bilaha ah waxaa soo saaro Dallada Waxbarashada ee Ilays Educational Academy. Ujeedadeedu waxay tahay in dadweynaha Sool, Sanaag, Cayn iyo cidii kale ee danaynaysa wax akhriskooda kor loo qaado. Majaladu waa maxali (local) ka hadla arrimaha SSC, waxbarashada, Aqoonta, cilmiga sayniska iwm.

ILAYS EDUCATIONAL ACADEMY

IEA BOGGA CILMIGA SAYNISKA IYO HORUMARKA ADUUNKA

Dallada Waxbarashada ee Ilays Educational Academy waxay dadaal ugu jirtaa sidii mandaqada Sool, Sanaag iyo Cayn looga heli lahaa manhaj waxbarasho oo is haysta laga bilaabo dugsi hoose ilaa jaamacad si bulshada loogu soo saaro qof tayo waxbarasho leh. Ma tijaabisey xarumaha waxbarashada ee Dallada Waxbrashada Ilays. Fadlan ubadkaaga kula daadaal inay helaan manhaj taxane ah.

Ilays Educational Academy
20 Ilays Road
Muse Yusuf Village
Lasanod
Sool County

Phone: 00 252 2 754737
Phone: 00 252 741 4067
e-mail: ilayseduservices@yahoo.com
www.ilayssocial.com

HORMUUDKA AQOONTA waa majalada qudha ee nooceeda ah ku soo baxda Afsoomaali

WHAT IS CLONING? NOOLE LA BEERAYO!

Kelmada “cloning” waxay afka Englishka la macno tahay **isku mid**. Haddaad dhegaysato idaacadaha, TViyada, wargeysyada iyo internet-kaba waxaad maqlaysaa ama arkaysaa iyadoo laga hadlayo “cloning problems” (dhibaatooyinka noole la beerayo). Markaa waxaa jira waxyaalo ay ku mudatay in kelmadu laga hadlo. Haddii aynu qeexno kelmada “cloning” waxay noqonaysaa in noole la abuuro iyadoo noole kale xubnihiisa ama unugyadiisa taranka la adeegsanayo. Sida geedka qayb ka mid ah inta la soo jaro oo lagu beero meel kale si geedkaas mid la mid ah loo abuuro. Sidoo kale wuxuu macnaheedu noqonayaa in noole jiran laga bedelo xubinta jira iyadoo loo beerayo xubin caafimaad qabta. **Cloning** ma aha wax cusub marka la fiiriyo dhinaca dhirta, geed weligii geed kale waa laga talaali jirey. Mataanaha oo kale waa cloned Allah sameeyey, waayo waxaa laga abuuray kala dhambalanka ugax isku mid ah. Laakiin waxaa cusub in aadamuhu ama culimada saynisku isku dayaan in qof ama xayawaan kale la sameeyo iyagoo adeegsanaya awoodooda xadidan. Culumada saynisku waxay isku dayeen in noole laga qaado unugyada hidasidayaasha firkiisa (DNA) oo la geliyo xuubka unugyo noole kale oo laga reebay bu’dii firka hidasidayaasha (DNA), si noolaha hore firkiisu u soo baxo. Hababka cloning waxaa loo kala qaybiyaa saddex dariiqo oo kala ah: (1) Adult Cell Cloning, (2) Embryo Cloning, iyo (3) Therapeutic Cloning or Biomedical Cloning.

Adult Cell Cloning-Unugyada Hidasidayaasha Firka ee noole ayaa la gelinayaa kiiska unuga ee noole kale ka bacdina waxaa lagu beerayaa noole 3aad ilmo galeenkiisa.



Dariiqada **Adult Cell Cloning** waxay sheegaysaa in Unuga Hidasidaha Firka ee la yiraahdo **UDDER** ee laxda 1aad ee madow in bu’diisii laga soo bixiyo, ka bacdina la geliyo kiishka ama xuubka unuga taranka oo xili bacrimin sug ah ku jirta ee laxda 2aad, kaas oo la yiraahdo **empty ovum** oo bu’dii unuga laga saaray. Waxaa samaysmaya ugax taran oo cusub (**cloned embryo**) oo ka kooban bu’da unuga taranka ee laxda 1aad iyo kiishka unuga taranka ee laxda 2aad. Ka bacdina waxaa lagu beerayaa ilmogaleenka laxda 3aad, halkaas oo bacrimintii laboodka loogu keenayo. Ka bacdi waxaa dhalanaya ilmo u eg laxdii 1aad ee madoobayd.

Embryo Cloning - Xayawaan ugub ah oo dareenkiisa galmada la cariyey baa laga qaadayaa ugax.



Dariiqada **Embryo Cloning** waxay sheegaysaa in xayawaan ugub oo dareenkiisa galmada la cariyey laga soo qaado ugaxda taranka, ugaxdaas baa la sii kala dhambalaa oo lagu beeraa dhowr xayawaan oo kale ilmagaleenkooda, halkaas oo loogu keeno unugyada taranka ee laboodka. Ka bacdina waxaa dhasha xayawaan u eg kii ugaxda laga soo qaaday. Dariiqadan waxay reer galbeedku ku isticmaalaan tarminta lo’da iyo doofaarada. Hal sac baa sanadkii dhala 50 neef oo lo’ ah, hal doofaarna wuxuu dhalaa ilaa 6o neef.

Therapeutic Cloning - Qof jiran oo xubin jidhkiisa ka mid ahi maqan tahay baa xubintii loo beerayaa, sida wadnaha, kelyaha, lafdhabarta, beerka iwm.



Dariiqada **Therapeutic Cloning** waa sidii qof xubin ka jiran loogu beerilahaa xubin caafimad qabta. Unuga Hidasidaha Firka ee xubinta qofka jiran baa bu’diisii laga soo bixinayaa, ka bacdina waxaa la geliyey kiishka ama xuubka unuga xubin caafimaad qabta oo qof kale laga soo qaatay, kaas oo bu’dii unuga laga saaray. Waxaa samaysmaya ugax taran oo cusub oo lagu korinayo shaybaadh si xubintii la rabay loo helo. Mar xubinta cusubi samaysanto baa la gelinayaa qofkii jiranaa.

Haddaba waxaa isweydiin leh CLONING ku ma hirgalay? Mise waa aragti saynis oo tijaabo ku jirta? Dariiqooyinka **Adult Cell** iyo **Therapeutic Cloning** waa lagu guuldaraystay tijaabooyinkii la qaaday boqolkiiba sagaashan iyo sideed, laakiin waxaa jirta in culumada sayniska ee dalka Scotland ay u dhalatay nayl calaan ah oo mudo yar noolayd markay taariikhdu ahayd 1997dii. Arrintaasi waxay rajo cusub iyo yididiilo horle gelisay culimada sayniska. Dariiqada kale ee **Embryo Cloning** iyada waa lagu guulaystay oo waxaa loo adeegsadaa tarminta xoolaha nool. Culumada Islaamka waxaa loo baahan yahay inay arrinta doorkooda ka hadlaan.

MURTIDA SOOYAALKA AH WAXAA LAGA SOO GUURIYEY: Nin baa wuxuu dhalay 7 wiil, markuu arkay inuu gaboobay oo geeriyi hayso buu damcay inuu wiilashiisa uga tago dardaaran dhaxalgal ah. Odaygii wuxuu wiilashii faray in mid kasta soo gooyo ul madheedh ah. Wiilashii waxay soo noqdeen iyadoo mid kasta sido ul qurux badan. Deeto wuxuu faray in todobda ulood la isku xidho. Markii la isku xidhay buu kii ugu yaraa u dhiibey oo ku yiri iyagoo isku xidhan kala jebi. Wiilkii yaraa waa isku deyey laakiin waa u suurtoobi weydey inuu kala jebiyo. Ka bacdina wuxuu ku yiri u dhiib ka adaga kaa weyn. Kii labaadna waa isku deyey laakiin waa u suurtoobi weydey. Todobadii wiilba waa isku dayeen inay kala jebiyaan, laakiin midna kuma guulaysan inuu kala jebiyo. Ka bacdi wuxuu ku yiri mid kastaa ushiisa ha la baxo oo ha isku dayo inuu kala jebiyo. Mid kastaa wuxuu ushii u kala jebiyey si sahal ah oo aan dhibba ka soomarin. Odaygii wuxuu wiilashiisii ku yiri haddaad isku xidhnaataan way adag tahay in nacabkiinu idinka adkaado. Haddiise aad kala tafaraaruqdaan oo kala tagtaan mid kasta wuxuu nacabkiisu ka helayaa meel cid la’ah. Murtidan waxaynu ka qaadanaynaa in isku xidhnaantu muhiim tahay, sidaas awgeed bulshada meel ku wada nool waa inay dhawraan isku xidhnaantooda, isla markaana waxa dhexdooda tafaraaruq gelinaya iska ilaaliyaan. Soomaalidu waxay xeeriyaan wada dhalashada, laakiin ogow dadku isuma xigaan xaga wada dhalashada oo keliya, laakiin waxay kale oo dadku isu xigaan xaga degaanka iyo derisnimada. Tusaale ahaan walaalkaa kaa dheer dhib ku haysata waxba kaaga ma tari karo, laakiin derisкaaga waxaad ka heli kartaa kaalmo degdeg ah. Sidaas awgeed ummadda isku xirkeeda ha la dhawro.

Doqoniimadu Daawo ma Leedahay? Intaynaan ka jawaabin doqoniimadu daawo ma leedahay, waxaan isku deynaa inaan fasiro doqonimadu maxay tahay. Doqoniimada waxaa lagu qeexaa qofka oo garaadkiisu ka hooseeyo wax fahanka ama garashada qofka caadiga ah. Somaalidu waxay doqoniimada u kala saaraan toban bahood oo saddex-saddex isugu bah iyo mid bahgooni ah, kuwaas oo kala ah: **S**urin dheer ka dhaanshe, **S**oor quudheed cune iyo **S**i xun u waran, waa saddex isku bah. **X**iddidki xante, **X**aajaduu watay ka xog warame iyo **X**iluhuu uureeyey xoog moode, saddexdaasina waa isku bah. **D**uufley, **D**aabley iyo **D**areenley, saddexdaasina waa isku bah. **G**ar ma gasho kama baxdo waa bahgooni. Qaybaha doqoniimada waxaa laga helaa dadka badankiisa, dadka qaar baa mid keliyi ku jirtaa, qaar baa labo ku jirtaa, qaar baa dhowr ku jiraan. Laakiin waxaa ugu daran qof shan ka mid ah laga helo ama mida tobnaad. **Doqoniimada daawadeedu waa waxbarasho**. Qof kasta oo aan waxbaran dhowr nooc oo doqoniimada ka mid ah baa ku jirta. La soco cadadka dambe oo lagu fasirayo bahaha doqoniimada.

Islaamku Wax Door ah ma ku Leeyahay Horumarka Sayniska?



Doorka Islaamku ku leeyahay horumarka sayniska waxaan ku soo qaadanaynaa aqoonyahankii Islaamka ah ee magaciisa la yiraahdo: Ibn Sina ama aabihii dhakhtarada.

Ibn Sina wuxuu dhashay markay taariikhda miilaadugu ahayd 980, wuxuu ku dhashay magaalo yar oo magaceeda la yiraahdo Afshana oo u dhow magaalada Bukhara, taas oo maanta ka tirsan dalka magaciisa la yiraahdo Usbekistan ee dhaca waqooyiga Iran. Aabihii waxaa la oran jirey Cabdullahi, wuxuuna ka tirsanaa Xerta Ismaaciiliya. Hooyadii waxay ka timi tuulo la yiraahdo Balkh oo iyana u dhow magaalada Bukhara. Ibn Sina wuxuu dhintay markay taariikhda miilaadigu ahayd 1037.

Dhanka reer galbeedka waxay Ibn Sina ugu yeedhaan “Avicenna”. Ibn Sina wuxuu ahaa qof Allah siiyey hibo fahan iyo garasho aad u saraysa. Markuu 10 jir ahaa wuxuu xifdisanaa Quraanka, isla markaana wuxuu cabqari ku ahaa luqada Carabiga, tafsiirka Quraanka, fahanka axaadiista, iwm. Laga bilaabo 10 jirkiisii wuxuu aad isugu taxalujiyey barashada fiqiga, xisaabta, dooda (logic), sayniska iyo luqadaha.

Markuu 17 jir ahaa wuxuu bilaabay inuu takhasus ka dhigto daaweynta iyo dhakhtarnimada. Da’diisoo yar awgeed wuxuu barashada dakhtarnimada markii hore la kulmay iska caabin xoog leh, laakiin wuxuu ahaa nin go’aanqaadasho adag oo wuxuu ku adkaystay inuusan isdhiibin ilaa uu yoolkiisa gaadhayo. Markuu 18 jir ahaa isagoo arday ah wuxuu ku caan baxay daaweynta iyo aqoonta dhakhtarnimada. Boqorkii Islaamka ee xiligaas mandaqada Bukhara xukumay oo magaciisa la oran jirey Samani Nuh Ibn Mansur (976-997), wuxuu Ibn Sina ku sharfay inuu si xor ah u isticmaalo maktabada kutubta cilmiga ah ee boqortooyada. Maktabadaas waxaa yaalay buugaag ama kutub badan oo aan markaa meel kale laga helin, taas waxay fursad qaaliya u ahayd Ibn Sina. Isagoo adeegsanaya hibada maskaxeed ee Allah siiyey, wuxuu ka soo hor ka laabtay wixii kutub taalay maktabada.

Markuu 21 jir ahaa wuxuu qoray buugiisii ugu horeeyey ee dakhtarnimada oo magaciisa la oran jiray **Shifo**. Isla xilligaas waxaa dhintay aabihiis, ka bacdina wuu ka guuray Bukhara. Ibn Sina wuxuu u guurey xaga galbeedka, isla markaana wuxuu shaqo ka helay Ali Ibn Ma’mun oo xukumay magaalo la oran jirey Khiva. Mudo ka bacdi Ibn Sina wuu ka qaxay Khiva isagoo ka cabsanayey inuu afduubo Suldaan Mahmud oo xukumay magaalada Ghazna. Mudo markuu qaxayey wuxuu tegey magaalo la yiraahdo Jurjan oo ku taal xeebta badda Caspian oo xiligaas ahayd xarun weyn oo waxbarsho, laakiin wuxuu la kulmay xili xun oo la diley xaakimka magaalada oo la oran jirey Qabus. Ibn Sina intuu joogay magaalada Jurjan wuxuu casharo badan oo ku saabsan Qaanuunka daawada iyo Dakhtarnimada ka jeediyey xarumihii waxbarashada ee magaalada ku yaaley. Xiligaas wuxuu bilaabay buugiisii weynaa ee la oran jirey “**Qanun Al-Tib**” qaybtiisii hore. Mudo ka bacdi wuxuu u guurey magaalo la yiraahdo Ray oo ku taal meel u dhown meesha ay hadda ku taal caasimada Iran ee Teheran. Halkaas wuxuu ka furtay rug caafimaad oo dadka lagu daweeyo. Mudo yar ka bacdi magaaladii Ray waa laga qaxay ka bacdi markii kooxi afduubtay maamulkii xaakimka. Ibn Sina wuxuu u qaxay magaalada Hamadan, halkaas oo uu ku daweeyey xaakimkii Amir Shamsud-Dawala oo qabay cudurka galaha iyo mindhicir xanuun. Xaakimkii magaalada Hamadan wuxuu u doortay in Ibn Sina u noqdo la taliye khaas ah. Xaakimka askartiisii baa dacwo masabid ah ku oogtay Ibn Sina ka bacdina waa la xidhay. Xaakimkii waxaa mar kale ku soo noqday xanuunkii galaha oo wuxuu ubaahday dakhtar. Sidaas darteed xaakimkii wuxuu xabsiga uga yeedhay Ibn Sina si uu u daweeyo, isagoo aad uga raaligeliyey xidhidii uu xidhay. Nolosha Ibn Sina waxay ugu mashquul badnay intuu deganaa Hamadan, waayo xaakimka waa la shaqayn jirey oo wuxuu ahaa la taliyihhsa khaaska ah, dakhtarna wuu ahaa, isla markaana wuxuu ahaa macalim bixiya casharo badan iyo muxaadarooyin uu ka jeedin jirey xarumaha waxbarashada iyo labadiisa kitaab ee Shifo iyo Qanun-Al-Tib.

Qarnigii 10aad wuxuu Ibn Sina nin ku sameeyey qaliin laga qalayo xameetida iyo beerka.

Waa socotaa cadadka dambe

XAYEYSIISKA SHIRKADAHA IYO JIRITAANADA GANACSIGA ADVERTISEMENTS

L E S C O

365 days a year, 52 weeks a year, 30 day a month, 24 hours a day, every minute in your life, we are on your duty.

LESCO waxay ku guulaysatey inay joogtayso, daryeesho, isla markaana ka haqabtirto xoogga korontada ee shacabka reer Lascanod ubaahan yahay. Marka Soomaaliya oo dhan isha la mariyo ma jiro shirkad kale oo aan cidina taageerin oo ku guulaysatey inay shacabkeeda dab siiso 24 saacadood ee isku soo wareegay. Shirkadaha korontada ee magaalooyinka Puntland waxaa laga caawiyaa shiidaalka hadana weli kuma aanay guulaysan inay joogteeyaan dabka shacabkoodu ubaahan yahay. LESCO way la socotaa in xoogaa macaamiisheedu ka cabanayaan sicir halkii KWA oo ay leeyihiin wuu sareeyaa, waan ognahay laakiin cidi nama caawiso oo weli xal kale ma hayno. Mustaqbalka dhow waxaanu wadnaa qorshayaal lagu horumariayo xoogga korontada ee Lascanod, isla markaana waxaanu rajaynaynaa inaad heshaan koronto jaban iyo dab ka xoog badan kan hadda aad heshaan. Taageer shirkadaada, wixii cabasho ahna ha naloo soo gudbiyo, si aanu u saxno khaladka jira ee laga cabanayo.

S O M T E L



Fast Internet. Cheap International Calls. Customer Friendly Staff. In the Centre of the City. Come and visit us today

SOMTEL waa shirkadihii ugu horeeyey ee wada u jeexay isgaadhsiinta mandaqada SSC. Welina heegan u ah adeega macaamiisheeda iyo casriyeynta qalabkeeda. Dedeji dalabkaaga waxaad la haysaba waad heli.

HAWD AND NUGAL TELECOM
HAN TELECOM
ISGAARSIINTA HAWD IYO NUGAL 100%

HANTELECOM

RELIABLE BUSINESS PARTNER

Iboufmfdpn !x bybz!lvv!tvvsuphfmjobz.tbb!jo!dbbmbn lb!ebbgji jjtb!cjbbti!mb.hbbhb!tpp!x bdj!lbsp/!Nb!v!tiffhubz!rbsbbcbebbeb! jzp! tbbyjjcbebb! jobz!cjbbti!lvv!tpp!x jdj!lbsbbo/!Gbembo!hbtip!Iboufmfdpn !sfou!mjof!!tj!ibeeb!mbhvv!tpp!x bdp/!!Lv!yjeibo!rbsbb.cbebbeb! jzp! tbbyjjcbebb! bejhpp! jt.ujdn bbmbzb! IBOUFMFDPN! JOUFSOFU!DBGFT-!n blf!dibuujoh!boe!tfoe!bo!fn bjm! opx/! Joufsofu! x bb! ippzbeb!djmn jhb! gbembo! jtlv! ebz! jobbe! lb!sbbejtp!n px evvdb!bbe!vcbbibo!ubibz/!